

Tix: GSH/07/14  
Kalfadhiga: 4aad  
Kulankiisa 5aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

2<sup>Da</sup> Abril 2014



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka

*QARAAR BARLAMANI AH*  
*(RESOLUTION)*

**GO'AAN GOLAHA SHACABKA OO LA XIRIIRA HESHIIS AY XUKUUMADU  
LA GASHAY SHIRKAD TURKI AH OO KU SAABSAN MAAMULKA  
DEKEDDA CAALAMIGA AH EE MUQDISHO 24kii OKTOOBAR 2013**

Muqdisho, 2<sup>da</sup> Abril 2014

BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA	
XAFIISKA GUDDOOMIYAH GELID / RECEIVED	
TAR:	214/2014
TIX:	163
SIXIX:	ESM Geeta (

## GOLAHA SHACABKA

**Markuu arkay** mas'uuliyadda ka saarran metelaada danaha guud ee shacabka iyo ilaalinta xuquuqda qofka;

**Markuu arkay** Qodobka 69 ee Dastuurka JFS oo qeexaya Awoodaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah;

**Markuu arkay** Qodobka 2aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka faqradiisa (p) ee ku waajib yeeleysa Golaha Shacabka ansixinta heshiisyada Caalamiga ah iyo heshiisyada ay Xukuumaddu la gasho Dowlado ama dhinacyo kale;

**Markuu arkay** Qodobka 99 (a, b, c, e) ee Dastuurka JFS oo qeexaya Xilka Golaha Wasiiradda;

**Markuu arkay** Qodobka 116 ee Dastuurka oo qeexaya ilaalinta xuquuqda Shaqaalah Rayidka ah;

**Markuu arkay** Sharci Lambar 7 ee Jannayo 1977 qeexayana Sharciga Maalgashiga Shisheeye ;

**Markuu arkay** Sharci lambar 19 ee Maarsa 1987 oo qeexaya Sharciga Maalgashiga Shisheeye;

**Markuu Kabaaraandegay:** Cabashada Shaqaalah Danyarta ah ee ka hawlgala Dekedda Caalamiga ee Muqdishu;

**Markuu Tixgeliyay** Daruufaha dhagaale ee dalka ka jirta;

**Wuxuu: Kalfadhiga 4aad kulankiisa 05 ee taariikhdu 02/04/2014 uu guddoonsaday qaraarkan:**

### Qodobka 1aad

In xukuumadda Federaalka Soomaaliya ku wareejin karin Dekedda Caalamiga ee Muqdisho Shirkad inta Golaha Shacabku ka xaqiijinayo waafaqsanaanta heshiiskan faritaanada sharciga maalgashiga shisheeye ee kor ku xusan iyo habraacyada heshiis-gelidda gaar ahaan sharci lambar 7 iyo 19 ee xeerinta maalgashiga shisheeye; Xeerka Maamulka Maaliyadda iyo Xisaabaadka Sharci lambar 1 ee

29kii Disember 1962 (Qodobada 32(a), 33(1) iyo wax ka bedelkiisii 27kii December 1971; sidoo kale Sharci lambar 2 ee 29 Disembar 1962 iyo wax ka bedelkii 27 Disember 1971 ee hubinta sharciyadda heshiisyada xukuumadu gasho; Sharci No. 1, Qodobka 33(1) habraaca diwaangelinta heshiisyada; sharci No. 2 Qodobkiisa 52aad ee tilmaamaya noocyada qandaraasyada, qodobka 53aad ee tilmaamaya habraaca bixinta qandaraasyada, Qodobka, Qodobka 57 (3) Bixinta Qandraasyadda Debadda, Qodobka 56 ee tilmaamaya Qaabdhismeedka Guddiga Qandraasyadda oo ah Guddiga kaliya ee leh awood qandaraas bixin, Qodobka 58aad ee tilmaamaya Habraaca qandaraas bixinta.

### **Qodobka 2aad**

In shaqaalaha danyarta ah ee ka hawlgala dekeda laga fariisin karin shaqadooda si sharcidarro ah iyada oo la xurmeynayo qodobka 116aad ee dastuurka;

### **Qodobka 3aad**

In ay xukuumadu horkeento Golaha Shacabka heshiiska ay la gashay shirkadda Turkiga muddo bil (30 maalmood) gudaheed ah;

### **Qodobka 4aad**

In xukuumadu firo u yeelato jiritaanka xeerarkii dalku lahaa, ayna ilaalintoodu tahay waajib dastuuri ah sida uu na farayo qodobka 139aad ee dastuurka iyada oo Golaha Shacabku yahay hay'adda kaliya ee awood sharci u leh inay buriso, wax ka bedesho ama wax ku kordhiso shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

